Imtixaamidda Gobolka 2012

Gacaliye Waalid/Mas'uul:

Gu' (spring) kasta, gobolka ayaa imtixaan ka qaada dhammaan ardayda dhigata fasallada 3-8 iyo 10 sidii loo hubin lahaa inay waxbarashadoodu dhabbahii la rabay. Natiijooyinka ka soo baxa imtixaankan ayaa muhiim dhammanteen inoo ah.

Ardayda ku jirta fasalada 3-8 ayaa ka qaybgaata **Qiyaasaha Horumarka Aradayda** (MSP). Kuwa ku jira dugsiga sare ayaa qaadan doona **Imtixaanka kartida Aqoonta Dugsiga Sare** (HSPE). Sidoo kale, gobolku wuxuu bilaabay imtixaanada dhammaadka koorsada aljabra 1 iyo joomatariga sanadii hore wuxuuna bilaabi doonaa waxbarashada cilmigi noolaha ee EOC bayoloji gu'ga 2012.

MSP waxay sidoo kale ku deeqaysaa akhrinta, xisaabta iyo sayniska oo intarnatka ah (fasalada 5 iyo 8). Laga bilaabo Abriil 2012, ardayda fasalka 3-8 waxay ku qaadan karaan akhrinta iyo xisaabta dhinaca combiyuurarka.

Imtixaannad gobolkeena waxa magaca loogu bixiyey inay gudbiyaan hadafyadooda gaarka ah.

MSP *waxay cabbirtaa horumarka ardayga*. Iyada oo la ogoyahay in natiijada MSP ay muhiim tahay, imtixaanka gobolku waa inaanu ahaan qiyaasta kaliya ee xirfadaha tacliineed, iyo aqoonta ardayga. Hawl gudashad ardayga oo dhan waa in markasta la tixgaliyaa.

HSPE waxay hubisaa sidii ardayda dugsiga sare ay ugu fiicnaan lahaayeen, ama ay u heli lahaayeen xirfadaha aasaasiga ah ee ay uga gudbi karaan jaranjarooyinka ku xiga ee noloshooda. Imtixaannada dugsiga sare ayaa lagu toosiyaa shuruudaha qalin-jabinta.

Ardayda dhammaan **fasalada 2012** waa inay gudbaan imtixaanka gobolka ee akhrinta iyo qorista, beddelka gobolku ansixiyo ama qiimaynta ardayda kujirta waxbarashada gaarka ah OONA waa inay ka gudbaan imtixaanka xisaabta gobolka ama kasbadaan laba dhibcood oo xisaab ah kadib fasalka 10aad.

Ardayda fasalada **2013** iyo **2014** waa inay gudbaan akhrinta, qorista iyo xisaabta si ay u mutaystaan qalin-jabin. Ardayda fasalka **2015** iyo wixii ka dambeeya waa inay gudbaan akhrinta, qorista, xisaabta iyo sayniska.

Haddii wax su'aalo ah aad ka qabtid waxa ku saabsan ilmahaaga waxbarashadiisa, fadlan la xiriir macallinka ilmahaaga ama la-taliyaha dugsigaaga. Si aad wax dheeraad ah uga ogaatid nidaamka imtixaannada gobolka, fadlan booqo: **www.watesting.com**.

Ayaa la Imtixaanyaa iyo Goorma?

Sharciga federaalka ah ee Ilmana Ayaan laga Tagin ayaa u baahan in sannad kasta lagu imtixaamno ardayda darajada fasallada 3-8 iyo 10 akhriska iyo xisaabta, iyo saddex darajo fasal (darajada 5, 8 iyo 10 Washington gudaheeda). Gobolkeenu waliba waxa u ku imtixaamaa ardayda qoritaanka (dajada fasallada 4, 7 iyo 10). Gobolkeena ayaa waliba u guuray dhinaca imtixaamidda oanlaynka.

Fasal	3aad	4aad	5aad	6aad	7aad	8aad	9aad	10aad	11aad	12aad
Akhris	✓■	✓■	✓■	✓■	✓■	✓■	NT	✓	*Loo baahan yahay kaliya haddii uuna ardaygu la kulmin shuruudda qiimaynta qalin-jabinta gobolka.*	
Xisaab	✓■	✓■	✓■	✓■	✓■	✓■	✓	✓		
Qorista		✓			✓		NT	✓		
Saynis			✓■			✓■	✓	✓		

■ Lagu bixinayo onlayn markay tahay guga 2012

NT Mawduuca casharka aan la imtixaamin (fasalada 9aad oo kaliya ayaa qaadandoona imtixaanka dhamaadka tacliinta ee xisaabta iyo culuumta, haddii ay duruusdaa dhigtaan)

Waxa la cusboonaysiiyey Julaay 2011

Jadwalka Imtixaamidda iyo Warbixinta Gobolka ee 2012

Maarj	
13-14:	Qorista hspe
15:	Akhriska hspe
JAN/FEB.	
Dabayaaqada Badhtanka:	Dib u Qaadista Xisaabta EOC
Abriil	
27:	Daaqadda imtixaanka MSP ee fasalada 3-8 ayaa bilaabmaya
MEY	
Mey 18:	Dhammaadada MSP (warqad)
Juun 4:	Dhammaadada MSP (intarnat)
Dhammaad Sannad	Imtixaanka xisaabta iyo biyoolajiyada ee EOC (oo dhicidoona 3da wiig ee isguulka ugu dambeeya)
JUUN	
Juun 1:	Isdiiwaan-galinta ayaa u bilaameysa HSPE-ga Ogast
Illaa 10ka:	Warbiximaha dhibcaha imtixaan HSPE ee loo soo diro guriga kuna socota darajo fasallo 10-12
Illaa 17ka:	Sii-deynta natiijooyinka gobolka-dhammaantiis ee HSPE
OGAST	
14-16:	Imtixaannidda HSPE ee Ogast
Dhammaadka:	Natiijooyinka MSP/HSPE ee loo sii daayey dhammaan ardayda
SEBT.	
Bartamaha:	Dhammaan warbiximaha loo diray guriga (dhammaan darajo fasal)

Waa maxay micnaha dhibcaha natiijada MSP/HSPE?

Ardayda ayaa ka hesha dhibco natiijo imtixaan kasta oo MSP/HSPE oo ay qaataan. Natiijada dhibcuhu waxay ku saleysan yihiin waxqabashada shaqsiga ardayga ah. Natiijooyinka dhibco waxay u qabsamaan afar heer (iyada heerka 3 iyo wixii ka sareeya ka gudbitaan yihiin):

Heerka **4** **Ka badatay Qiyamkii Gobolka:** Waxay ka dhigan tahay ka adkaanta xirfadaha iyo aqoonta maaddada

Heerka **3** **Waxay la kulantay qiyamkii Gobolka:** Waxay ka dhigan tahay ka adkaanta xirfadaha iyo aqoonta maaddada.

Heerka **2** **Ka hooseeya qiyamka Gobolka:** Waxay ka dhigan tahay ka adkaanta qaarkood ee xirfadaha iyo aqoonta maaddada.

Heerka **1** **Aad uga hooseeya Qiyamka Gobolka** Waxay ka dhigan tahay ka adkaan yar ama aan jirinba ee xirfadaha iyo aqoonta maaddada.

Imtixaamidda Gobol: Su'aalaha Mar Kasta La Warsado

Waa maxay sababta annaga la noogaga baahan yahay inaan qaadanno imtixaanka gobolka?
Sababtu waa iyada oo ay u baahan yihiin sharciyada gobolka iyo federaalkuba. Nidaam qiimeynta gobolkeena ayaa la hirgaliyey iyada oo u jawaabeysa Sharcigii Wax-Ka-Beddelka Waxbaraashada Gobolka ee 1993. Imtixaannada gobolkeena ayaa waliba oofiya uga baahnida Sharciga Ilmana Yaan laga Tagin (NCLB). NCLB waxay u baahan tahay qiimeynno-sannadle ah oo akhriska iyo qoraalka ardayda ku jirta fasallada 3-8 iyo dugsiyada sare. Ardayda waliba waa in lagu imtixaano sannadkii kasta -sayniska saddex heerar darajo fasal. Washington ayaa sidaas sameysa iyada imtixaanta ardayda ku jirata darajada fasallada 5, 8 iyo 10.

Goorma ayay qoysasku helaan natiijooyinka dugsiga sare ee imtixaanka gobolka?
Horraanta Juun. Ardaydu waxay heli doonaan dhibcaha HSPE ee akhrinta iyo qorista Juun 2012. Dhibcaha imtixaanka dhammaadka koorsooyinka xisaabta iyo sayniska la heli maayo ilaa Ogosto 2012. Hoosta ka eeg si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan imtixannada xisaabta dhammaadka-koorsada ah.

Goorma ayay qoysasku helaan natiijooyinka fasallada 3-8 imtixaanka (MSP)?
Horraan illaa dhexda Sebtember. Warbixinta-dhibcaha ardayda ayaa loo geeyaa degmooyinka dugsi dhammaadka -Ogast. Degmooyinka dugsi ayaa markaa mas'uul ka ha inay u diraan qoysaska ka-warbixinta natiijooyinka dhibcaha. Haddii aadan helin warbixinta-natiijada dhibcaha la xiriir xafiiska degmada ama dugsiga.

Waa maxay imtixannada xisaabta dhammaad-koorsada ah oo goorma ayaa la bixiyaa?
Dhammaadka koorsada, ama EOC, imtixaanka xisaabta waxa lagu heli karaa aljabra I iyo Joomatari, sayniska EOC-na waxa lagu heli karaa bay'oolaji. Arday kasta oo qaadanaya aljabra I, joomatari ama bay'oolaji laga bilaabo fasalka 7aad iyo wixii ka kasareeya, wuxuu qaadan doonaa EOC-da saxda ah. EOC-da waxa la siiyaa saddexda tod-dobaad ee u dambeeya dugsiga gudahooda. Ardayda fasalka 2015 iyo wixii ka dambeeya waa inay gudbaan labada xisaabood ee EOC si ay u qalin-jabiyaan.

Qiyaasaha Horumarka Aradayda (MSP) iyo Imtixaanka kartida Aqoonta Dugsiga Sare (HSPE) ayaa ka gaabnaa kuwii hore, laakiin miyay ka fududaayeen?
Maya. sidii 2010, natiijooyinkii MSP iyo HSPE gu'ga 2011 may muujin horumar darajo oo wayn. Imtixaannada ayaa walli ahaan-doona qiyaaso waxqabad sax oo la isku-hallayn karo. Maadaama imtixaanku u gaaban yahay micnaheedu ma aha inay ka fudud tahay.

Imtixaanidda Gobolka Onlaynka ah

Washington Maaha gobolka ugu horreeyey ee ku dhaqaaqa in imtixaan lagu qaadi intarnatka, laakiin waxay ku jirtaa hogaamiyayaasha. Ujeedada Gobolku waxa weeyaan in inta badan ee ardayda iskuulka dhexe iyo ka hoose ee waxakhriska iyo xisaabta, iyo sayniska, imtixaanka lagaga qaado dhinaca combiyuutarka ee dhamaan isguulada ka hor taariikhda 2014.

Waqtiga kuleylihu soo galayo ee 2012, imtixaanka MSP, ee fasalada 3-8, waxa lagu qaadi-doonaa intarnatka, iyada oo fasalada 3aad ay noqon-doonto markii ugu horeysay. Cilmi-baadhis ayaa lagu sameeyay sidda ay u suura-gali-karto in imtixaanka lagu qaado intarnatka, ee arrimaha la xidhiidha qoraalka fasalada 4aad illaa kuwa 7aad, ee casharada qoraalka.

Sideen ugu diiwaan-galiyaa ilmahayga Natiijooyinka Dugsiga Sare (HSPE) iyo goorma?
Diiwan-galinta imtixaanka Ogast ayaa sida caadiga ah agagaaraha Juun1. Waxaad ka diiwaan-galin kartaa imtixaanidda xagaaga halkan www.k12.wa.us/testregistration ama adiga oo u waca (866) 400-9275. Dib u qaadista imtixaanada EOC waxay dhici doonaan sannad kasta Jeeniwari/Feebarwari.

Imtixaanadee onlayn ah?
Gu'ga 2012, gobolku wuxuu ku deeqi akhrinta iyo xisaabta oo onlayn ah fasalada 3-8 iyo sayniska MSP fasalada 5 iyo 8.

Inankayga ama inantaydu wali miyey u baahan tahay inay gudubto imtixaanka gobolka si ay uga qalin-jabiso dugsiga sare?
Haa. Fasal kastaa wuxuu leeyahay shuruudo gaar ah. Fadlan waydii la-taliyahaaga dugsiga.

Waa maxay noocaca su'aalood ee ku yimaad imtixaannada gobolka?
Imtixaannada MSP Iyo HSPE waxa ka mid ah su'aalo jawaabo la kala doorto leh iyo su'aalaha jawaabta gaaban u baahan. Su'aalaha afarta-dhibcood la siinayey ayaa laga daayey imtixaannada akhriska, xisaabta iyo sayniska. Wax ka beddelkan ayaa u oggolaaneysa -ardaydu inay muujiyaan inay karti u leeyihiin xallinta -masalooyinka, iyaga oo aan marka dhibco lagu siin kartidooda -qorista ee imtixaannada xisaabta, akhriska iyo -sayniska.

Aragtidooda Guud ka eeg Imtixaannada Gobolka

Ardayda iyo waalidiintu ma ah inay wareer ka qaadann imtixaannada gobolka, laakiin ma aha imtixaan kaliddii in lagu nuuxnuusado oo fiirao gaar ah la siiyo. Wax ka muhiimsan xirfada iyo aqoonta aasaasiga ah.

- Ku dhiirri Ilmahaaga inu u shaqqeeyo sida isaga/iyaga kartidiisa ugu wanaagsan ah. Haddii warbixinta dhibcaha ilmahaagu muujiyaan inuu uga baahan yahay caawimaad mawduucyada cashar qaarkood, taasi arrin xun ma aha. Dugsiyadu waxay yaqaaniin sida loo bar-tilmaameysto caawimada.
- Ka fikir wax ku saabsan maalinta imtixaanka ilmahaaga waxa u caadiga ah. haddii aad dareento inuu ilmahaagu u baahan yahay caadiyeysi ka duwa muddad imtixaanka mooyee (tus., hurdo ka badan ama dhaqdhaqaaq jir ka badan), raac caadeysiga isaga/iyada horeyba ugu caawisa inay guul ka soo hooyaan dugsiga.
- Kala hadal ilmahaaga arrimha ku saabsan waxa u uga soo waayo arkay imtiaannidda. Ardayda qaarkood ayaa dareema inay wax u tareyso inay ka hadlaan arrimaha ku saabsan imtixaannada. Haddii ilmahaagudhaho isagu/iyadu wey ku adkaatay qayb ka mid ah imtixaanku, kala hadal macallinka ilmahaaga sidii aad u ogaan lahayd haddii isagu/iyadu ay kala kulmaan arrimo sidaas oo kale ah fasalka.

Sidee ayaa anigu…

U arkaa imtixaanka ilmahayga?
waalidiinta ayaa weydiisan karta inay dib-u-eegaan buugga(aagta) imtixaanka ilmahooda, laga bilaabo Sebtember 6, 2011. Buugaagta imtixaanka ayaa loo diraa kolba degmada dugsi ee ardaygu dhigto si dib loogu eego. Fadlan booqo: www.k12.wa.us/assessment/StudentRecordRequest.aspx.

Rafcaan inaa ka qaato dhibcaha ilmahayga?
Dadka heysta darajooyinka ay kaga gudbeen imtixaanka dugsiga sare oo kaliya, ayaa rafcaan qaadan kara. Natiijooyinka dhibco ee fasallada 3-8 ee Qiyaasaha Horumarka Aradayda rafcaan lagama qaadan karo. Fadlan booqo: www.k12.wa.us/assessment/Appeals.aspx.

Office of Superintendent of Public Instruction
Old Capitol Building
P.O. Box 47200
Olympia, WA 98504-7200

Wixii Macluumaad Dheeraad Ah
OSPI: **www.k12.wa.us**
MSP/HSPE: **www.WAtesting.com**
Su'aalaha: **StateTesting@k12.wa.us**